



**GOBALKA MAINE  
WAAXDA WAXBARASHADA  
23 STATE HOUSE STATION  
AUGUSTA, ME 04333-0023**

**JANET T. MILLS  
GUDOOMIYAHA GOBALKA**

**A. PENDER MAKIN  
GUDOOMIYAHA**

**Waxaa loo adeegsanayaa GURYAHA DARYEELKA MAALINKA EE WAREEGGA II  
Luuliyo 1, 2023-Juun 30, 2024**

Waalidka Qaaliga ah:

Hooyga Daryeelka Maalintii ee aad ka diiwaan gelinayso cunugaaga ayaa qayb ka ah Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta iyo Dadka Waawayn ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (U.S. Department of Agriculture's Child and Adult Care Food Program). Tani waxay ka dhigan tahay in Adeeg bixiyaasha Daryeelka cunugaaga ay qasab ku tahay inay bixiso cuntooyin iyo kaalmaati buuxinaaya ama ka heer sareeya shuruudaha nafaqada ee ay dajisay Dawlada Maraykanka. Badalka buuxinta shuruudahaan, Adeeg bixiyaha waxay helaysaa lacag ay ka helayso USDA oo ku salaysan heerarka dakhliga ee qoysaska loo adeeggaayo.

Lagaama doonaayo inaad buuxiso foomkaan laakiin haddii aad doonayso inaad buuxiso, adeeg bixiyahaaga ayaa heli kara qarash celin dheeraad ah oo ku aadan cuntooyinka la siiyay cunugaaga. Haddii aad buuxiso foomkaan, waxaad haysataa dookha aad toos ugu celin karto adeeg bixiyahaaga ama maal geliyaha adeeg bixiyaha. Haddii aad doonayso inaad foomkaan toos ugu dirto maal geliyaha, ku celi foomka aad buuxisay:

Magaca Maal geliyaha: \_\_\_\_\_

Ciwaanka: \_\_\_\_\_

Lambarka Taleefanka: \_\_\_\_\_

\_\_\_\_ Halkaan saxiix haddii aad aqbalayso inaad u ogolaato adeeg bixiyahaaga, \_\_\_\_\_,  
(Magaca Buuxa ee Adeeg bixiyaha)

inuu qaado foomkaaga uuna u diro maal geliyaha. Adeeg bixiyahaaga ma akhrin doono foomkaaga.

***Fadlan haku celin foomka aad buuxisay Waaxda Waxbarashada.***

**Tilmaamaha codsiga lifaaqa ku jira:**

1. Geli Magaca iyo da'da cunuga aad codsiga u samaynayso.
2. Haddii cunuga aad codsiga u samaynayso uu yahay xubin qoyskaaga kamid ah kaasoo qaata gunnooyinka Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, Barnaamijka Caawimaada Kaalmada Nafaqada - oo horay loo oran jiray Food Stamps), TANF (Temporary Assistance to Needy Families (Caawimaada Ku meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan), ama qaata gunnooyin lagu baxsho Food Distribution Program on Indian Reservations (FDPIR, Barnaamijka Qaybinta Cuntada ee Dhaqan Dhawrka Hindida), waxaad ku bixin kartaa lambarkiisa kiiska SNAP, TANF ama FDPIR "Qaybta I" kadibna waxaad u boodi kartaa tilmaamaha #6.
3. Qu qor magaca qof kasta oo ku nool "qoyska". "Qoys" waa koox kasta oo dad ah oo isla nool wadaagana qarashaadka nolosha. Shaqsiyaadkaan ayaa noqon kara qaraabo ama dad aan waxba isku gelin.
4. Afarta (4) god ee ugu danbaysa lambarka Social Security ee xubinta qoyska ama masuulka saxiixa foomka codsiga. Haddii aan qofkaan haysan Lambarka Social Security, erayga "NONE (MA JIRO) waa in lagu qoraa

meesha banaan.

5. Qor dakhliga guud kahor intaan laga jarin wax lacago ah, ee ka yimaada dhammaan ilaha dakhliga, ee dhammaan shaqsiyaadka guriga ku wada nool.

6. Saxiixa, ciwaanka, iyo lambarka taleefanka ee qofka buuxinaaya codsiga. Taariikhda foomka la saxiixay waa in sidoo kale lagu daraa.

Sharciyan, haddii mid kamid ah xogta kore ee la codsaday aan lagu darin foomka codsiga, Maal geliyaha Adeegyada Bixiyaha Daryeelka Imuhu waa inuu tixgeliyaa suuragalnimada in cunugaagu qabo xaalad u qalanta in Adeeg bixiyuhu helo heerka ugu hooseeya ee qarash celinta cuntooyinka iyo kaabista uu u sameeyay cunugaaga.

Shaxda soo socota waxay muujinaysaa heerka sare ee dakhliga qaybta 'Wareegga I' ee mudada u dhaxaysa **Luuliyo 1, 2023 ilaa Juun 30, 2024**. Haddii wadarta guud ee dakhliga qoyskaagu ay u dhiganto ama ka yar tahay cadadka la muujiyay, adeeg bixiyaha u adeegaysa cunugaaga ayaa awoodi doonta inay hesho Wareegga I, ama heerka ugu sareeya, ee magdhawga lacagaha cuntada ama kaalmaatiga la siiyo cunugaaga.

### Cabirka u qalmida ee Cuntooyinka "Qiimaha Jaban"

<b>Tirada Qoyska</b>	<b>Sanad kasta</b>	<b>Bil kasta</b>	<b>Labo jeer Bishii</b>	<b>Labadii Asbuuc ba Mar</b>	<b>Asbuuc kasta</b>
1	26,973	2,248	1,124	1,038	519
2	36,482	3,041	1,521	1,404	702
3	45,991	3,833	1,917	1,769	885
4	55,500	4,625	2,313	2,135	1,068
5	65,009	5,418	2,709	2,501	1,251
6	74,518	6,210	3,105	2,867	1,434
7	84,027	7,003	3,502	3,232	1,616
8	93,536	7,795	3,898	3,598	1,799
<b>Xubin Kasta oo Dheeraad ah oo Qoyska kamid ah</b>	9,509	793	397	366	183

Haddii xubin kamid ah dadka kula nool shaqo la'aan noqdo, cunugaaga ayaa u qalmi kara cuntooyinka "Wareegga I" inta lagu jiro mudada shaqo la'aanta, marka la cadeeyo in luminta dakhligu ay keenayso in dakhliga qoysku galo heerarka u qalmida.

Haddii aad codsiga ku matalayso Cunug Dawladu Biisho, fadlan arintaan ku cadee codsiga.

Si waafaqsan Sharciga Maraykanka iyo xeerka Waaxda Beeraha ee Maraykanka, Hooygaan Daryeelka Maalintii waxaa mamnuuc ka ah inay qof u takoorto ayadoo cuskanaysa sababo isir, midab, wadaniyadda qofka, jinsiga, da'da, ama naafada.

Si aad u gudbiso cabashada takoor, qoraal u dir USDA, Agaasimaha, Xafiiska Dacwada, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410 ama wac (866) 632-9992 (cod) ama (800) 877-8339 (TTY) ama (800) 845-6136 (Isbaanish). USDA waa adeeg bixiye iyo loo shaqeeye loo siman yahay.

Mahadsanid.

Daacadnimo,

Shaqaalaha CACFP

**MAgACA ADEEG BIXIYAHA (Maaha Magaca Ganacsiga):** \_\_\_\_\_

**CODSIGA CUNTOOYINKA QIIMAHA WAREEGGA I**  
**GURYAHA DARYEELKA MAALINTII EE WAREEGGA II**

**BARNAAMIJKA CUNTADA DARYEELKA CARRUURTA IYO WAAYEELKA (CACFP)**

**CUNUGA CODSIGA AWGIIS LOO GUDBINAAYO: Magaca:** \_\_\_\_\_

**Da'da:** \_\_\_\_\_

**OGOOW:**

Haddii aad codsanayso gunnooyinka CACFP adoo wakiil ka ah Cunug Aad korsatay, fadlan tigsaar godkaan:

**QAYBTA 1:**

**Qoysaska helaaya gunnooyinka SNAP, TANF ama FDPIR, ama kuwa uu u joogo ilmo qayb ka ah National School Lunch Program (Barnaamijka Qadada ee Dugsiyada Dawlada) oo ah midkood heerka cuntada "Bilaashka ah" ama "qiimaha jaban":**

Haddii aad hadda qaadato Gunnooyinka SNAP, TANF ama FDPIR, iyo haddii cunuga magaciisa kor lagu sheegay lagu daro deeqda, waxaad ku sheegi kartaa lambarkaaga kiiska SNAP, TANF ama FDPIR laynka loo qorsheeyay. Haddii cunug wayn oo qoyska kamid ah uu qayb ka yahay National School Lunch Program (Barnaamijka Qadada ee Dugsiga Dawlada) oo lagu baxsho heerka "bilaashka ah" ama "qiimaha jaban", fadlan tigsaar godka loo qoondeeyay. HA BUUXININ qeybta II, u bood Qaybta III. Qaybta III waa in lagu qoraa magaca qoran iyo saxiixa qofka wayn ee buuxinaaya foomkaan iyo taariikhda codsiga la buuxshay.

- (a)  HAA: Qoyskaan hadda wuxuu u qaataa gunnooyinka SNAP, TANF, ama FDPIR ee cunuga kor magaciisa lagu sheegay.
- (b) Lambarka Aqoonsiga SNAP \_\_\_\_\_ (maaha EBT)
- (c) Lambarka Aqoonsiga TANF \_\_\_\_\_
- (d) Lambarka Aqoonsiga FDPIR \_\_\_\_\_
- (e)  "NSLP" — Ka qaybgalaha Barnaamijka Qadada Dugsiga Dawlada ee "Bilaashka ah" ama "qiimaha Jaban"

**OGOOW #1:**

Haddii aadan helin gunnooyinka SNAP, TANF ama FDPIR ee cunuga magaciisa kor lagu sheegay, haddii aad ku fashilanto inaad sheegto lambarka kiiskaaga, ama haddii cunug wayn oo qoyska kamid ah uusan u qalmin cuntooyinka "Bilaashka ah" ama "Qiimaha Jaban" ee Barnaamijka Qadada Dugsiga, waa inaad buuxisaa Qaybta II iyo Wareegga III si cunugaagu ugu qalmo qiimaha cuntooyinka "Qaybta 1".

**QAYBTA II:**

**Dhammaan Xubnaha Kale ee Qoyska:**

- (a) Xubnaha Qoyska: Qor magaca dhammaan qof kasta oo qoyskaaga ku nool. Xaqiiji inaad kudarto naftaada iyo cunugaaga magaciisu kor ku yaalo.
- (b) Lambarka Amaanka Bulshada (Social Social Security): Farqadaha 9 iyo 17 ee Sharciga Qadada Dugsiga Dawlada ayaa qasab ka dhigaaya in, ilaa in lambarka Food Stamp, TANF ama FDPIR ID ee cunugaaga aad keento maahee, ay qasab tahay inaad soo raaciso afarta (4) god ee ugu danbaysa Lambarada Bulshada (Social Social Security) ee qofka wayn ee qoyska kamid ah ama masuulka saxiixaaya codsiga. Haddii qofkaas uusan haysan Lambarada Amaanka Bulshada (Social Social Security), qofkaas waa inuu ku qoraa erayga "NONE" meesha banaan. Sheegista Lambarka Amaanka Bulshada (Social Social Security) qasab maaha, laakiin haddii afarta (4) god ee ugu danbaysa Lambarka Social Security aan la bixin, ama erayga "NONE" aan la gelin meesha banaan, codsiga lama aqbali doono.
- (c) Dakhliga: Qor DHAMMAAN dakhliga ka yimaada DHAMMAAN ilaha ee la helay bishii lasoo dhaafay kuna soo dhacay isla magaca dakhliga qaatay. Dakhligu waa inuu yahay midka GUUD, macnaheeduna yahay, inuu ahaado cadadka la helay KAHOR INTAAN LAGA JARIN canshuuraha, Amaanka Bulshada, daymaha, caymiska, iwm. Ku qor cadadka dakhli kasta hoosta godka saxda ah.

**QOR DHAMMAAN XUBNAHA QOYSKA:**

Magaca Xubinta Qoyska	Da'da	Wadarta Guud ee Mushaarka Bishii ama Lacagta Faa'iidada Ganacsiga Shaqsiga ah	Cadadka bishii aad ka hesho TANF, Alimony, Fayadhawrka, Taageerada ilmaha	Lacagaha Beeshinka ee Bilaha ah, SSI, Social Security, Magdhawga Shaqaalaha, Caymiska iyo Hawlgabka
1.				
2.				
3.				
4.				
5.				
6.				
<b>(Ogoow: Dakhliga asbuuc kasta x 4.333 asbuuc; dakhliga labadii asbuucba mar x 2.15 asbuuc)</b> <b>WADARTA GUUD EE DAKHLIGA BISHII SOO GALA QOYSKA:</b>				

**QAYBTA III:**

Si waafaqsan Sharciga Maraykanka iyo xeerka Waaxda Beeraha ee Maraykanka, Hooygaan Daryeelka Maalintii waxaa mamnuuc ka ah inay qof u takoorto ayadoo cuskanaysa sababo isir, midan, wadanka qofka, jinsiga, da'da, ama naafada.

Si aad u gudbiso cabashada takoor, qoraal u dir USDA, Agaasimaha, Xafiiska Dacwada, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410 ama wac (866) 632-9992 (cod) ama (800) 877-8339 (TTY) ama (800) 845-6136 (Isbaanish). USDA waa adeeg bixiye iyo loo shaqeeye loo siman yahay.

**GANAAXYADA LAGU MUTAYSTO XOGTA KHALDAN:** Waxaan qirayaa in dhammaan xogta kore ay run tahay ayna sax tahay iyo in dhammaan dakhliga aan ku sheegay meesha. Waxaan fahmayaa xogtaan in lagu bixin doono sabab la xariirta qaadashada Deeqaha Federaalka ayna Saraakiisha Barnaamijku xaqiijin karaan xogta ku qoran codsiga ayna bixinta xog khaldan si kas ah aan ugu baxshay codsigaan ay keeni karto in dacwad la igusoo oogo sida ku cad sharciyada quseeya ee Gobalka iyo Federaalka ee Danbiyada.

**SAXIIXA:**

(Magaca Qofka Wayn)	(4 god ee ugu danbeeya Lambarka SS)	(Saxiixa Qofka Wayn)
(Ciwaanka Guriga Qofka Wayn)		(Taleefanka Gurigga)

Ma haysto lambarka Amaanka Bulshada (Social Social Security)

**QAYBTAAN WAXAA BUUXIN DOONA MAAL GELIYAHA HOOYGA DARYEELKA GURIGA:**

Saxiixa: \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_

Qaybta U qalmida ee Cunuga (Goobin Geli midkood):

Wareegga I

Wareegga II